

Gaadiidka khaaska ah ee iskuulada

Maamulka gaadiidka dadwaynaha ee dawlada hoose wuxuu la tacaalaa gaadiidka khaaska ah ee iskuulada dawlada hoose ee Västerås iyo Sala. Si aad ugu socdaasho gaadiidka khaaska ah ee iskuulka , waa in aad marka hore codsi gaysataa dawladaada hoosse marka hore, wixii xog dheeraad ah la xidhiidh dawladaada hoose.

Dalbo gaadiidka khaaska ah ee iskuulada

Marka laguu ogolaado gaadiidka iskuulada , waa in aad noo soo dirtaa dalabka adiga oo isticmaalaya foomkayaga. Foomamka ku haboon waxaad ka helaysaa:
<http://www.ltv.se/Kollektivtrafik/sarskild-skolskjuts>

Si dalabkan sida ugu dhakhsaha badan laguugu dhamaystiro, foomka ku buuxu koombiitar oo iimayl ugu dir planering.ktf@ltv.se

Mudada aan ku dhamaystiraynaa waa ilaa laba asbuuc waxaanuna kula soo xidhiidhi marka aad bilaabi karto isticmaalka gaadiidka iskuulka. Hadii aad qabto wax su'aal ah, soo dhawaw oo naga soo wac 0771-17 62 86 ama iimayl noogu soo dir planering.ktf@ltv.se

Tir tiria iyo dib balan u qabsashada

Waa muhiim in aad tir tиро gaadiidka iskuulka maalmaha ardaygu uuna tagaynin. Hadii aad tir tirtay gaadiidka iskuulka illa ogaysiis danbe, (tusaale, hadii uu ardaygu buko oo aadan saadaalin Karin maalinta uu tagayo) waa waajib in aad dib u balansato marka uu ardaygu bogsado awoodana in uu Iskuulka tago marlabad. Xasuuusnaw in aad samayso tan xiliga ugu haboon, maalin ka hor iskuul tagida, hadii ay suurto gal tahay

Si aad dib ugu balansato ama aad u tir tиро gaadiidka iskuulka

Wac 0771-17 62 86 ama iimayl u dir planering.ktf@ltv.se

Waan ka jawaabnaa taleefanada iyo iimaylada maalmaha fasaxa inta u dhaxaysa 06.15 iyo 17.00.